

Xaashida Xaqiiqda COVID-19

Tallaalada COVID-19 ee Johnson & Johnson Waa La Hakiyay Ohio

Abril 13, 2021, Badhasaab Mike DeWine, Maamulaha Waaxda Caafimaadka Ohio Stephanie McCloud, iyo Sarkaalka Ugu Sarreeya Waaxda Caafimaadka Ohio Bruce Vanderhoff, M.D., waxa dhammaan ku taliyeen in bixiyayaasha tallaalka COVID-19 inay si kumeel gaadh ah u joojiyaan tallaalka Johnson & Johnson (Janssen).

Tani waa jawaabta Maamulka Maraykanka ee Cuntada iyo Dawooyinka (DFA) iyo Xarumaha Kahortagga iyo Xakamaynta Xanuunada (CDC) [taladoodii in la hakiyo isticmaalka tallaalka Johnson & Johnson](#) ilaa inta daraasad dheeraad ah lagu samaynayo xinjirawga dhiigga ee naadirka ah ee lixda qof lagu arkay Maraykanka kadib markii ay tallaalka qaateen.

Xinjirawga Dhiigga Naadirka ah waxaa la sheegey

Celcelis ahaan 6.8 milyan oo tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson ayaa lagu bixiyay Maraykanka ilaa iminka. Lix kiis oo xinjirawga dhiigga oo loo yaqaan cerebral venous sinus thrombosis (CVST) ayaa la arkay oo ay weheliyaan platelets-ka dhiigga oo yar (thrombocytopenia), siday sheegeen FDA iyo CDC. Isku darka xanuunadani aad ayay u yar tahay. Dhammaan lixda kiis waxay ku dhaceen dumar da'doodu u dhaxayso 18-48 jir. Astamaha waxaa lagu arkay lix ilaa 13 maalmood kadib markii la tallaalay, oo hal kiis ayaa dhintay.

Daawaynta lagu taliyo ee noocan gaarka ah ee xinjirawga dhiigu waxa uu ka duwan yahay daawaynta sida kale loogu dawooyo xinjirawga dhiigga, sida ay sheegtey CDC. Caadiyan, dawada anticoagulant ee loo yaqaan heparin ayaa loo isticmaa daawaynta xinjirawga dhiigga. Markan oo kale, dawada heparin haddii la siiyo waxay noqonaysaa khatar, oo dawooyin kale waa in la siiyaa.

Tallaalka Johnson & Johnson waxaa uu isticmaalaa fayras wax laga badalay si uu tilmaamaha u siiyo unugyada si ay u koobiyeeyaan korodhka borootiinta ee SARS-CoV-2 (fayraska keena COVID-19). Fayras aan firfircoonayn, sida ka keena hargabka caadiga ah, ayaa loo isticmaalaa vector (ama aalada qaaditaanka) si loo bixiyo tilmaamaha samaynta spike protein-ka. Jidhku waxa uu u arkaa borootiinka sidii wax soo weeraray oo waxa uu abuuraa nidaam difaac oo uu kula dagaalamayo.

Talaabooyinka xiga

Gudida Latalinta CDC ee Nidaamka Tallaalka (ACIP) waxay kulmeen Arbacada, Abril 14, si ay u naqdiyaan kiisaska oo ay u qiimeeyaan waxa ay keeni karto. Gudidu may siinin wax talo ag CDC, oo waxay qorshaynayaan inay dib u kulmaan celcelis ahaan 7-10 maalmood kadib marka markaas oo samayn doonaan qiimayn khatarta iyo faa'idada ah. FDA waxa ay qiimayn doontaa qiimaynta iyada oo sidoo kale daraasadaynaysa kiisaska. Joojinta kumeel gaadhka ah ee tallaalka Johnson & Johnson bixintiisa ayaa sii socon doonta.

Waxay tani uga dhigan tahay dadka hore u qaatay tallaalka Johnson & Johnson?

Sida ay sheegeen CDC, khatarta yeelashada xaaladahan aad ayay ugu yar tahay dadka qaatay tallaalka wax ka badan hal bil. Haddii aad dhawaan qaadatay tallaalka Johnson & Johnson **saddexdii toddobaad ee lasoo dhaafay gudahood**, CDC

waxay ku talinaysaa in aad doonato daawayn caafimaad haddii aad yeelato madax xanuun daran, calool xanuun, luge xanuun, ama neefta oo ku dhibta.

Dadka waa inayna ka warwarin madax xanuunka yar iyo astaamaha hargabka oo kale ah dhawrka maalmood ee ugu horeeya kadib tallaalka. Kuwani waa caam, waxyeelo malaha oo waxaa keena nidaamka difaaca ee ka jawaabaya tallaalka.

Maxay tahay inay dadku sameeyaan haddii ay qabsataan balanta tallaalka Johnson & Johnson?

Bukaanka leh balamaha soo socda ee tallaalka Johnson & Johnson waa inay la xidhiidhaan bixiyayaashooda isla markaba wixii ku saabsan tilmaamaha balantooda. Haddii bixiyahaagu aanu markaba heli karin labada tallaalka ee Moderna ama Pfizer, bukaanka waxa ay u badan tahay in balantiisa la joojin doona ama mar kale mustaqbalka loo qaban doono.

Talaalada Moderna iyo Pfizer waxa ay isticmaalaan teknoojiyad ka duwan kuwa talaalka Johnson & Johnson. Ma jiraan wax walaac amaan ah oo in la yeesho ah tijaano caafimaad lagu ogaaday ama maadaama oo loo ogolaaday isticmaalka xaalada degdeg ah talaalada messenger RNA (mRNA). Talaalada mRNA waxa ay adeegsadaan waxyaabo dabiici ah si ay u siiyaan koodhka hidde-sidaha unugyada si ugu sameeyo oogada/spike protein-ka fayraska SARS-CoV-2. Borootiinta lagu sameeyay qaabka mRNA waxay kiciyaan nidaamka difaaca, iyagoo baraa inuu u arko spike protein inuu yahay duulaan, oo uu sameeyo antibodhi la dagaalama.

La socodka amaanka ee joogtada ah

CDC iyo cidda kale ee iskaashiga ay la leeyahay ee heer fadaraal waxay sii wadaan inay kala socdaan talaalka cusub wixii saamayn daran ah, iyaga oo isticmaalaya nidaamyada la socodka amaanka talaalka oo badan. Lasii socodkan waxay sheegi kartaa saamaynta caafimaad daro ee aan lagu arag markii hore ee la samaynayay tijaabada caafimaadka.

Haddii uu qof la kulmo saamayn xun kadib marka la talaalo, bixiyahooda talaalka waxa uu u diri doonaa warbixin [Nidaamka Wargelinta Dhacdada Saamaynta Xun ee Talaalka](#) (VAERS). VAERS waxa weeye nidaam qaran oo ka uruuriya warbixin xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, warshadaha talaalka, iyo shacabka wixii ku saabsan samaaynta xun ee timaada talaalka kadib. Warbixinaha dhacdada saamaynta xun ee la filan karo, waxa aad moodaa inay ka badan yihiin intii la filanayay, ama ay leeyihiin qaab aan caadi ahayn oo waxaa la wadaa daraasadahooda.

Haddii baadhitaanku uu muujiyo in talaalku uu khatar keenayo, dadka maamulaa waxay soo saari karaa tilmaamo cusub oo ku saabsan cida ay yahay inay qaadata ama cida ay tahay inayna qaadan.

Waxaa la abuuray Abriil 14, 2021.

Macluumaad dheeraad ah, booqo coronavirus.ohio.gov.

Jawaabaha su'aalaha aad ka qabto COVID-19, wac 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634).

Caafimaadkaaga maskaxdu wuxuu u muhiim yahay sida caafimaadka jirkaaga. Haddii adiga ama ehelkaagu aad waajahaysaan walaac la xiriira aafada koronafayras, caawimo ayaa diyaar ah 24 saac maalintii, toddobada maalmood toddobaadkii. Wac COVID-19 CareLine 1-800-720-9616.